# Adeegyada Heshiisiinta Qoyska



Sida Qoysaska La Isugu Hayo

Washington State
Department of Social & Health Services
Children's Administration

## Ulajeedada Sharciga

Xeerka  Cadaaladda Caruurta ee 1977 (Juvenile Justice Act of 1977) (Qaybta 13.32A RCW) ayaa Baarlamanku ku cadeeyay "in qoysku yahay xididka ugu muhiimsan Nolosha Maraykanka loona baahan yahay in la kobciyo ahaadona mid jira inta aan la hayn marag-kac kalifaya cagsiga."

Sannadkii 1990 ayaa baarlamanku wax ku kordhiyay xeerka si loogu daro dhallinta halista ku jirta. Sannadkii 1995 ayaa baarlamanku ku daray caruurta u baahan adeegyo. Waxa sharcigaa loogu talogalay:

- In la caawiyo waalidka dhibaatooyin ka haystaan dhallinta halista ku sugan;
- In la siiyo hab maxkamadeed waalidka iyo dhallinta si gargaar loogu helo khilaafyada culus ee ka jira guriga; iyo
- In qoysaska iyo dhallinta laga caawiyo helitaanka daweyn, badbaadin, iyo daryeel kale.

## Adeegyada Heshiisiinta Qoyska (Family Reconciliation Services)

Dawladda Gobolka Washington waxay bixisaa Adeegyada Heshiisiinta Qoyska (Family Reconciliation Services) (FRS) iyadoo la marayo 'Department of Social and Health Services, Children's Administration (CA), Division of Children and Family Services (DCFS)' (Wasaaradda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, Maamulka Caruurta, Qaybta Caruurta iyo Adeegyada Qoyska). FRS waxay qoysaska ka caawisaa inay wax ka qabtaan dhibaatooyinka sida ilmaha baxsada, ilmaha oo aan si caqli-gal ah u raacin xeerarka qoysaska, ama marka ay jiraan dhibaatooyin culus oo ka dhexeeya waalidka iyo ilmahooda.

Dhallin kasta iyo waalid kasta oo ay haystaan dhibaatooyin culus, waalid kasta oo ilmihiisu baxsaday, ama dhallin kasta oo baxsaday ayaa codsan kara gargaarka FRS. DCFS waxay adeegyo siisaa tobaneeyo-jirka cimrigoodu u dhexeeyo 13 ilaa 17 iyo qoysaska.

FRS waxay isku daydaa in heshiis laga dhex dhaliyo waalidka iyo ilmaha, in dib loo mideeyo qoyska, in la isku xejiyo lana xoojiyo unugga qoyska. Adeegyadu waxay ka kooban yihiin qaabilaad/qiimeyn, kala-talinta qalalaasaha, iyo, marka taasi haboon tahay, meeleyn mudo gaaban ah oo qofka dhallinta ah lagu geeyo meel guriga ka baxsan.

Waalidka ama dhallintu waxay adeegyada FRS ka codsan karaan xafiiska DCFS ee ku yaalla xaafadda ay ku nool yihiin. Haddii qofka dhallinyarada ahi uu u baxsaday beel kale, waxa uu markaa adeegyo codsan karaa isago oo la xidhiidhaya xafiiska DCFS ee ku yaalla beeshaa. Lambarada teleefonada ee xafiisyada DCFS waxa laga helaa buugga teleefonada qaybta xafiisyada dawladda gobolka Washington.

Qofka dhallinyarada ah iyo/ama qoysku waxay caadi ahaan shaqaale bulsho la yeehsaan wada-hadal, kaasoo uu ku xigo ballan. Shaqaalaha bulshada, qofka dhallinyarada ah, iyo qoysku waxay ka wada hadli doonaan waxyaabaha ka socda qoyska dhexdiisa iyo waxa qoyska iyo qofka dhallinyaradi ah sameyn karaan si ay u xaliyaan khilaafkooda. Waxa dhici karta in shaqaalaha bulshadu u gudbiyo qoyska kala-talin qalalaase ama adeegyo kale si la isugu dayo in la xaliyo khilaafka.

Adeegyada FRS waxa loogu talogalay in qoyska la isku hayo oo aanay kala tagin. Adeegyadu waa u ikhtiyaar qoyska. Waxay isu keenaan qofka dhallinyarada ah iyo waalidka si la isugu dayo in la xaliyo khilaafka. Shaqaalaha Qaabilaada CA iyo la-taliyeyaal qandaraasle ah ayaa ka dhiga la-talinta iyo adeegyo kale kuwo la heli karo 24 saacadood, todabada cisho ee todobaadka, iyaga oo aan kharash ku joogin qoyska.

Ka dib marka dadaal caqli-gal ah oo loo galay xalinta khilaafku keeni waayo heshiis, waxa suurogal ah meeleyn guriga dibada ka ah oo gaaban marka ay jiraan xaaladaha ugu adag iyadoo qoyska iyo qofka dhallinyarada ahi sii wadi doonaan isku-dayidda xalinta khilaafka. Haddii qofka dhallinyarada ah lagu meeleeyo goob daryeel oo guriga dibadda ka ah, waxa laga filayaa waalidka qofka dhallinyarada ah inay ka qaybqaataan kharashka daryeelka qofka dhallinyarada ah. Qaybta 'Division of Child Support' (Qaybta Taageerada Ilmaha) ee wasaaradda ayaa go'aamin doonta heerka ka-qaybgalka kharashka ee waalidka laga rabo.

## Haynta Boliisku Hayo Qof Dhallinyaro ah

Waa in sarkaal boliis ah soo xidho qof dhallinyaro ah marka ay jiraan xaaladahan soo socda:

1. Haddii waalidku boliiska ku soo wargaliyo in qof dhallinyaro ahi ka maqan yahay guriga iyada oo aan waalidku taa oggalaan.

2. Haddii sarkaal boliis si caqli-gal ah u aaminsan yahay in qofka dhallinyarada ahi halis ku sugan yahay iyadoo sababtu tahay da'da qofka dhallinyarada ah, goobta, iyo/ama wakhtiga maalinta.

3. Haddii qofka dhallinyarada ahi ka baxsado guri korin (foster home) ama guri koox, isla markaana hay'adda sharci-ahaan masuulka ka ah qofka dhallinyarada ahi ogeysiiso boliiska in qofkii dhallinyarada ahaa baxsaday.

4. Haddii maxkamad dhallinyaro u sheegto boliiska in qof dhallinyaro ahi jabiyay amar meeleyn maxkamad dhallinyaro ama haddii maxkamaddu ay boliiska ku amartay inay soo qabtan qofka dhallinyarada ah.

Ka dib marka la soo qabto qofka dhallinyarada ah, sarkaalka boliisku waxa uu qofka dhallinyarada ah geyn doonaa guriga waalidka ama goobta shaqada ee waalidka una sheegi doonaa qoyska adeegyada laga heli karo aagga ama degmada.

Marka aanay suurogal ahayn in qofka dhallinyarada ah lagu celiyo guriga, sarkaalku waxa uu qofka dhallinyarada ah geyn karaa 'Secure Crisis Residential Center (SCRC)' (Xarun Daganaansho oo Sugan oo Qalalaasaha Loogu Talogalay), waa haddii mid la heli karo. Haddii xarun SCRC aan la heli karin, sarkaalku waxa uu qofka dhallinyarada ah geyn karaa xarun shaqaale sugan oo ah CRC ama waxa uu u geyn karaa DCFS si loo meeleeyo. Ama, sarkaalku waxa uu qofka dhallinyarada ah u geyn karaa qof qaraabo ah oo xilkas ah, qof kale oo weyn oo xilkas ah, ama gabood dhallinyaro oo liisan leh (shelter). Sarkaalku waxa uu ogeysiis siin doona DCFS marka uu sameynayo meeleyn ah CRC ama SCRC, ama shaqaalaha CRC ama SCRC ayaa ogeysiin doonaa DCFS ka dib meeleynta. Shaqaalaha CRC ama SCRC ayaa FRS kala hadli doona qoyska.



# Ikhtiyaarka Kale ee u Furan Dhallinyarada iyo Waalidka

## Xarunta Daganaanshaha ee Wakhtiga Qalalaasaha (Crisis Residential Center) Meeleynta (CRC)

Marka qof dhallinyaro ah lagu meeleyo goob CRC ama goob kale oo liisan leh, ulajeedadu waxa weeye in qofka dhallinyarada ah lagu celiyo qoyskiisa sida ugu dhakhsaha badan. Beelaha ay ka jiraan goob CRC oo sugan (quful leh), qofka dhallinyarada ah ee la geeyo goobtaa waa inuu meesha joogo ugu yaraan 24 saacadood. Ka dib 24 saacadood, waxa qofka dhallinyarada ah la geyn doonaa goob CRC oo shaqaale sugan laakiin aan qufulnayn haddii ay u eeg tahay inaan qofka dhallinyarada ahi baxsan doonin isla markaana aanuu halis u ahayn inuu naftiisa ama dadka kale waxyeelo. Qofka dhallinyarada ahi waxa uu joogi karaa ama goob CRC oo sugan ama goob leh shaqaale sugan ilaa shan cisho.

Qofka dhallinyarada ah iyo qoysku waxay heli karaan la-talin qoys mudada meeleynta CRC si la isugu dayo in la xaliyo khilaafka qoyskana la mideeyo.

Marka khilaafku aad u daran yahay ee aan qofka dhallinyarada ahi guriga ku noqon karin shan cisho gudahood, shaqaalaha CRC iyo FRS ayaa qoyska kala wada hadli doona wixii ah ikhtiyaar: waxan ka mid ah ikhtiyaarkaa in loo oggalaanayo qofka dhallinyarada ah inuu mudo gaaban la joogo saaxiibo ama qaraabo; in lagala shaqeeyo DCFS meeleyn mudo gaaban oo ka dhacda hoy korin (foster home); in la buuxiyo codsi Dhallin Halis ku Sugan (At-Risk Youth petition); ama in la buuxiyo codsi Ilmo u Baahan Adeegyo (Child in Need of Youth petition). DCFS waxay ka fiirsan doontaa in la oggalaado meeleyn daryeel korin kaliya marka laga wada fiirsaday adeegyada kale ee qoyska iyo beesha, isla markaana DCFS ay oggalaatay inaan ikhtiyaar kale oo habooni jirin.

## Koox Beeleed oo Isugu Jirta Xirfado Badan

Waalidka iyo dhallintu waxay codsan karaan koox beeleed oo isugu jirta xirfado badan, marka la heli karo, si looga caawiyo xalinta khilaafka kana qaybgalaan la-talinta iyo adeegyada kale. Kooxdu waxay waalidka iyo qofka dhallinyarada ahba u noqotaa hab taageero. Qofka dhallinyarada ah iyo qoysku waxay codsan karaan in dadka ay yaqaanaan, sida wadaadada, tababareyaasha, macallimiinta, saaxiibada, ama qaraabadu, ka qaybgalaan kooxda.

## Codsiga Dhallin Halis ku Sugan (At-Risk Youth Petition)

Sharciga Washington waxa uu u sharaxayaa Dhallin Halis ku Sugan (At-Risk Youth) (ARY) qof dhallinyaro ah:

(a) oo guriga ka maqnaa ugu yaraan 72 saacadood oo isku xigta isaga oon oggalaansho ka haysan waalidkii;

(b) oo ka faraxabay xukunka waalidka sidaa daraadeedna qofka dhallinyarada ah akhlaaqdiisu ay halis galinayso caafimaadka, amaanka, ama wacnaanta qofka dhallinyarada ah laftiisa ama qof kale; ama

(c) qof dhallinyaro ah oo leh dhibaato ama balwad isticmaali-xumi daroogo isla markaana aanay jirin dacwado ciqaab oo socda oo la xidhiidha isctimaal-xumida daroogada.

Codsiga Dhallin ku Jirta Halis (At-Risk Youth petition) waxa uu u oggalaanayaa waalidka ilmo-hayaha ah inay maxkamadda dhallinta weydiistaan gargaar si qofka tobaneeyo-jirka ah loogu hayo guriga isla markaana loo dajiyo shuruudo caqli-gal ah oo la rabo in qofka dhallinyarada ahi raaco, sida tagista dugsiga, adeecista xeerarka qoyska, ama tagista kulannada la-talinta. Haddii qofka dhallinyarada ahi adeeci waayo amar maxkamadeed, qofka dhallinyarada ah waxa laga soo qaadi karaa inuu ku edeb-darooday maxkamadda waxana la geyn karaa goob xabsi ah ilaa todoba cisho.

Waalidka codsanaya codsi ARY waxay sharci ahaan leeyihiin haynta qofka dhallinyarada ah. Waalidka lagama rabo inay bixiyaan kharashka qiimeynta FRS iyo la-talinta laakiin waxa dhici karta in laga rabo inay bixiyaan kharashka adeegyo kale. Waalidku waa inay qiimeyn qoys ka buuxiyaan xafiiska DCFS ee degmada ka hor intaanay buuxin codsiga ARY.

## Ilmo u Baahan Adeegyo (Child in Need Services) (CHINS)

Marka la-talinta, la-noolaashaha qaraabada, ama dadaal kale oo la mid ahi xalin waayo khilaafka qofka dhallinyarada ah iyo waalidka isla markaana qofka dhallinyarada ah ama waalidku doonayaan in qofka dhallinyarada ah lagu meeleeyo goob ka baxsan guriga, waxa qofka dhallinyarada ah ama waalidka suurogal u ah inuu buuxsado codsi CHINS.

Sharciga gobolka Washington waxa uu u sharaxay ilmo u baahan adeegyo qof dhallinyaro ah:

(a) oo ka faraxabay xukunka waalidka sidaa daraadeedna qofka dhallinyarada ah akhlaaqdiisu ay halis galinayso caafimaadka, amaanka, ama wacnaanta qofka dhallinyarada ah laftiisa ama qof kale;

(b) oo maqnaantiisa lagu soo wargaliyay hay'adda sharci-fulinta isagoo oggalaansho la'aan iska maqnaa ugu yaraan 24 saacadood oo isku xiga taasoo dhacday laba jeer ama wax ka badan oo aan isku xigan isagoo ka maqnaa guriga waalidka, goob CRC, goob meeleyn oo guriga ka baxsan, ama goob meeleyn oo maxkamadi soo amartay; iyo

- (i) oo muujiyay inuu leeyahay dhibaato isticmaali-xumi daroogo daran;
- (ii) oo muujiyay akhlaaq u keenaysa halis culus caafimaadka, amaanka, ama wacnaanta ilmaha ama qof kaleba; ama

(c) (i) oo u baahan adeegyada lagama-maarmaanka ah, sida cuntada, gabood (shelter), daryeel caafimaad, dhar, ama waxbarasho; ama adeegyo loo qorsheeyay isu haynta ama dib-u-mideynta qoyska;

(ii) oo heli karin, ama diiday inuu isticmaalo adeegyadaa; iyo

(iii) oo waalidkiisu keenay marag-kac dadaal joogto ah oo aan lagu guuleysan loona jeeday isu-haynta qoyska ama aan awoodin ama raalli ka ahayn inay sii wadaan dadaal ujeedadiisu tahay isu-haynta qoyska.

Waalidka waxa suurogal u ah inay buuxsadaan codsi CHINS marka xaaladaha ku saabsan qofka dhallinyarada ah ee lagu sheegay sharaxaadda ay jiraan. Qofka dhallinyarada ah ama shaqaalaha bulsho ee DCFS ayaa buuxin kara codsi CHINS haddii mid ka mid ah xaaladaha sare jiraan, gaar ahaan haddii waalidku aanay qofka dhallinyarada ah u oggalaan doonin inuu ku noolaado guriga waalidka isla markaana aan u soo diyaarin doonin goob kale oo qofka dhallinyarada ahi ku noolaado.

Waa in qofka buuxinaya codsiga uu muujiyo in qofku isku dayay in la xaliyo khilaafka, in dhamaan wixii ah beddelaad caqli-gal ah la dhameeyay, iyo inay qofka dhallinyarada ah u fiican tahay inuu ku noolaado dibadda guriga iyadoo uu qoysku sii wadi doono in xoog looga shaqeeyo xalinta khilaafka. Waa in waalidka ama ilmaha xeraysanaya codsi ka buuxiyo xafiiska DCFS qiimeyn qoys isagoo kaashana shaqaalaha bulshe ee DCFS ka hor intaan la xereysan codsiga CHINS.

Haddii maxkamaddu aqbasho meeleynta ka baxsan guriga, qofka dhallinyarada ahi waxa uu caadi ahaan la noolaan doonaa qof qaraabo ah ama waxa uu ku noolaan doonaa guri korin oo liisan leh. Wasaaraddu waxa kaliya ee ay maamusha meeleynta qabanqaabisaana bixinta adeegyada marka ilmaha lagu meeleeyo guri korin oo liisan leh ama qof qaraabo ah oo aan looga baahnayn liisan. Haddii maxkamaddu doorato in ilmaha la geeyo guri aan qaraabo ahayn oo aan liisan lahayn, DCFS waxay xidhaa kiiska ama faylka waxana ay talaabadaa ku wargalisaa maxkamadda.

Waalidka ama DCFS waxay codsan karaan baa'binta hawlgalka CHINS ee maxkamadda haddii DCFS aanay bixin karin adeegyada iyadoo sababtu tahay:

(a) Qofka dhallinyarada ah oo ka maqnaa meeleynta maxkamaddu aqbashay mudo ah 30 cisho oo isku xigta ama in ka badan;

(b) Waalidka ama dhallinyarada, ama dhamaantoodba, ay diidan yihiin inay la shaqeeyaan waxqabad haboon oo la heli karo oo loogu talogalay dib-u-mideynta qoyska; ama

(c) Wasaaraddu waxay dhameysay dhamaan adeegyada la heli karo ee haboon ee keeni lahaa dib-u-mideyn.

Maxkamaddu waxay qaban doontaa dhageysi dib-u-fiirin ah gudaha 90 cisho si loo hubiyo horumarka qoyska xagga dib-isku-noqoshadooda. Haddii qofka dhallinyarada ahi aanuu ku noqon karin guriga marka dhageysiga dib-u-fiirintu dhaco, qofka dhallinyarada ahi waxa uu sii joogi doonaa goobta meeleynta ilaa lix bilood oo kale. Ka dib sagaal bilood, waa in ilmuhu guriga ku noqdo.

Maxkamaddu waxay ku amri kartaa waalidka inay ka qaybgalaan la-talinta qofka dhallinyarada ah ama adeegyo kale si looga caawiyo qofka dhallinyarada ah inuu qoyska dib ugu noqdo wakhtiga ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Haddii qofka dhallinyarada ahi ka soo bixi waayo amarka CHINS, xaakinku waxa uu ku qaadi karaa ixtiraam-daro maxkamadda lagula kacay waxana uu ganaaci karaa qofka dhallinyarada ah iyo/ama waxa uu ku xukumi karaa qofka dhallinyarada ah xidhis ah ilaa todoba cisho. Waxa kaloo dhici karta in waalidka lagu qaado ixtiraam-daro maxkamad lagula kacay haddii ay ka soo bixi waayaan adeecidda amaradda maxkamadda.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan FRS, ARY, ama CHINS, wac lambarka Adeegyada Heshiisiinta Qoyska (Family Reconciliation Services) ee ku yaalla buugga teleefonkaaga ee ku hoos qoran qaybta 'Washington State, Department of Social and Health Services, Division of Children and Family Services.

# Adeegyada Beesha

## Adeegyada Daweynta

Wixii ah adeegyada caafimaadka maskaxda, qofka dhallinyarada ah iyo/ama waalidku waa inay si toos ah ula xidhiidhaan xarunta caafimaadka maskaxda ee degmada.

Wixii ah war ku saabsan barnaamijyada walfidda ama qabatinka kiimikada, waa in qofka dhallinyarada ah iyo/ama waalidku wacaan khadka 24-ka saacadood ee gargaarka aalkolada/daroogada (24-Hour Alcohol/Drug Helpline) oo bilaash ah lambarkuna waa 1-800-562-1240 (Waa Washington kaliya).

## Xaqiiqada ku Saabsan Tagista Dugsiga

DSHS kama qaybgasho wax hawl ah oo la xidhiidha ka-maqnaanta dugsiga. Wixii ah war dheeraad ah, kala xidhiidh dugsiga degmadaada ama maxkamadda dhallinyarada ee degmada.

Sharciga Washington waxa uu qorayaa in dhamaan caruurtaa jira ugu yaraan 8 sannadood kana yar 18 sannadood ay dhigtaan dugsi dadweyne, gaar ah ama guriga ah. Dugsiga waxa u suurogal ah inay si ku-meel-gaadhsis ah ardayga u fasaxaan marka waalidka iyo shaqaalaha dugsigu ku heshiiyaan sababta maqnaanta.

Dhallinyarada lagama rabo inay tagaan dugsiga haddii ay jiraan 16 sannadood ama ka weyn yihiin iyo haddii:

(a) Waalidka dhallinyaradu oggalaadaan inaanay u baahnayn inay tagaan dugsiga ama dhallinyaradu ay sharci ahaan qaangaadh yihiin; iyo

(b) Dhallinyaradu si joogta ah oo sharci ah shaqo u haystaan; ama

(c) Ay ka soo baxeen shuruudaha qalin-jabinta; ama

(d) Ay heleen shahaadada dugsiga sare (GED).

*Cawaaqibka ka iman kara maqnaanshaha aan cudur-daar lahayn:*

## Waa in saraakiisha dugsigu:

- Ogeysiiyaan waalidka ka dib hal maqnaansho oo aan cudur-daar lahayn oo dhacay bil gudaheed;
- Ay soo diyaariyaan shir lala yeesho waalidka iyo ilmaha ka dib marka ay dhacaan laba maqnaansho oo aan cudur-daar lahayn bil gudaheed;
- Waa inay qaadaan talaabooyin ilmaha lagaga gargaarayo inuu yareeyo maqnaanshaha (sida iyadoo wax laga beddelo barnaamijka dugsiga, la siiyo gargaar gaar ah ardayga);
- Waa inay maxkamadda ka xereystaan dacwad dugsi ka-maqnaansho ka dib todoba maqnaansho oo aan cudur-daar lahayn bil gudaheed ama 10 maqnaansho oo aan cudur-daar lahayn sannad gudihii.



## Maxkamadaha:

- Waa inay bixiyaan ogeysiis qabtaana dhageysi;
- Waxa suurogal u ah inay waalidka ku amraan inuu bixiyo ganaax maalin kasta oo ay dhacdo maqnaansho aan cudu-daar lahayn ama inuu adeeg bulsho ka qabto dugsiga ilmaha;
- Waxa suurogal u ah inay ilmaha ku qaadaan ixtiraam-daro maxkamad lagula kacay marka uu diido inuu dhigto dugsiga waxana ay ilmaha ku xukumi karaan ilaa todoba cisho oo ah xadhig meel qufulan ama inuu bixiyo qanaax, waxa kaloo ay ku amri karaan adeeg bulsho, waxay kiiskiisa u gudbin karaan guddida dugsi ka-maqnaanshaha ee beesha (community truancy board).

## Boliiska:

Waxay qaban karaan qofka dhallinyarada ah ee dugsiga ka maqnaada waxana ay ilmaha u geyn karaan dugsiga, waalidka dugsiga, ama barnaamij degmo oo loogu talogalay ardayda dugsiga ka maqnaanta ama sagsaagta.



Washington State
Department of Social
& Health Services

**Children's Administration**

DSHS 22-448(X) SM (Rev.1/04)